

### Waxyaabaha ay tahay in hore looga sii fekero/ loo sii qorsheeyo:

- Meeshaad si nabadgelyo leh uga bixi lahayd (albaabbada/ daaqadaha)
- Qol ammaan ah oo aad u cararri karto (siday suuragal u tahay inaad bannaanka u baxdo, waa in aanay oollin alaab dhibaato kuu geysanaysa)
- Meeshaad tegi lahayd (saaxiibbo, qaraabo, guriga ammaanka)
- Telefoonka waa inaad si fudud u heli kartaa
- Diyaarso marmarsiinyo aad bannaanka ugu bixi kartid; wax caado kuu ah oo aad sida caadiga ah si joogto ah bannaanka ugu baxdo (tusaale ahaan sida qashin soo tuuridda)
- Haddii qofka aad xaaska isu tihiin ku soo helo, sidee uga baxsan kartaa.

### Waxyaabaha ay tahay in loo fiirsado:

- Astaamaha tilmaamaya inuu qofku dagaallamid isticimaali doono (neefsasho degdeg ah, feer duubasho, wejiga sida ka muuqata iyo siduu qofku samaynayo)
- DAGAALLAMIDDU INTAANAY BILAABAN BANNAANKA U BAX!
- HADDAAD CARARRI KARI WEYDO, MADAXA IYO CALOOSHA BADBAADI OO FOORORSO, GACMAHANA ISAGA DHIG NABARADA. SI XOOG AHNA U QAYLI!

### Hadday carruuri jirto:

- Carruurta mar walba kaxayso, sababtoo ah qofkaad xaaska isu tihiin wuxuu kuu isticimaali karaa inuu carruurta kugu guumeysto oo awood kuu sheegto.
- Carruurta bar inay haddii loo baahdo waci karaan lambarka caawimadda degdegga ah (hätänumero).
- Carruurta hore ugu sii sheeg, inay dhici karto inaad tagtaan.
- KALA SHEEKAYSO DAGAALLAMIDDA IYO WAXYAABAHA AY TAHAY IN LA SAMEEYO, MARKAY JIRTO XAALAD DHIBAATO DEGDEG AH LEH!



Telefoon lambarka booliska:

---



Cinwaanka gurigga ammaanka:

---

---

Telefoon lambarka gurigga ammaanka:

---



Telefoon lambarka Taksiga:

---

Cinwaankaaga:

---

---

Telefoon lambarkaaga:

---

Markaan ku talogelayo inay dhici karto inaan si degdeg ah guriga uga baxo waxaan u baahanahay waxyaabahan (boorsada ammaanka)

**Waxyaabaha aan ku diyaarsanayo boorsada ammaanka:**

- Lacag
- Guriga furayaashiisa isbeerka ah
- Dhar aan ku beddesho
- Waxyaabaha nadaafadda loo isticimaalo (cadday iwm)
- Telefoon (telefoonka gacanta kaarkiisa, lambarada telefoonada ee muhiimka ah)
- Rijootoyinka daawooyinka iyo daawooyinka
- Dukumeentiyada iyo kaararka muhiimka ah (sida kaarka caymiska bukaanka = KELA kortti, baasaboorka, kaarka bangiga)
- Carruurta alaabtay ku ciyaaraan kuwa ay ugu jecel yihiin

Waxyaabo kale, maxay

---



---

# QORSHAHA AMMAANKA EE SHAKHSI AHAANEED

